



**MILWAUKEE
PUBLIC SCHOOLS**

Meey 7, 2021

Salaan, Qoysaska MPS,

Warqadan waxaa loogu talagalay in tilmaamo lagu siiyo qoysaska leh ardayda qaata adeegyada waxbarashada gaarka ah oo qof ahaan looga xaadiro iyo kuwa doortay inay waxbarashada ku sii wataan khadka tooska ah. Intii lagu guda jiray xiritaanka dhismaha dugsiya, Milwaukee Public Schools (MPS) waxay sii waday dib u eegista, turxaan bixinta, iyo hirgelinta fursadaha adeegyada waxbarasho ee khadka tooska ah ee loogu talagalay dhamaan ardayda, oo ay ku jiraan ardayda naafada ah. Geedi-socodkaas joogtada ah awgiis, MPS, iyadoo raacaysa tilmaamaha Waaxda Waxbarashada Dadweynaha ee Wisconsin (DPI), marka adeegyada aan la bixin karin ama adeegyada aan waxtar lahayn iyadoo lagu saleynayo baahida ardayga, MPS waa inay tixgelisaa haddii ay tahay inay bixiso, iyo baaxadda, adeegyada waajibka ah ama adeegyada dheeraadka ah loo baahan yahay sababo la xiriira saameynta cudurka faafa inta lagu jiro sanad-dugsiyeedka 2020-21. Go'aamadaan waxaa la gaari doonaa iyadoo lagu salaynayo arday kasta shakhsiyadiisa.

Hirgelinta Adeegyada IEP, Adeegyada la Xiriira, Adeegyada Aan Caadiga Ahayn, iyo Taageerooyinka

Dhammaan adeegyada ay MPS u fidiso ardayda aan naafada ahayn inta lagu jiro waxbarashada khadka tooska ah iyo waxbarashada qof ahaan looga soo xaadiro ayaa sidoo kale loo heli doonaa ardayda naafada ah. Adeegyada loo tixgeliyo inay yihiin kuwo dheeri ah ayaa lagu qori doonaa IEP-ga, oo ay ka mid yihiin soo noqnoqoshada, qadarka, iyo muddada Xulashooyinka adeegyada dheeraadka ah waxaa ku jiri doona adeegyada la bixiyo inta lagu jiro maalinta dugsiya, adeegyada la bixiyo kahor/kadib maalinta dugsiya, adeegyada la bixiyo inta lagu jiro barnaamijyada xagaaga, iyo/ama adeegyada la bixiyo inta lagu jiro kal-fadhiga meeriska ee gaarka u ah iskuulka.

Qoysaska doorta inay sii wataan waxbarashada khadka tooska ah, macallimiinta iyo shaqaalaha taageerada waxay sii wadi doonaan inay bixiyaan waxqabadyo looga shaqeyn karo guriga si looga caawiyo ardayda inay gaaraan himilooyinkooda waxbarasho iyo inay xiriir la yeeshaan kheyraadka bulshada. Macallimiinta iyo shaqaalaha adeegyada khaaska ah ee la shaqeeya ardaygaaga waxaa laga yaabaa inay haayaan kheyraad gaar ah oo ku habboon in lagu daboolo baahiyaha ardaygaaga iyo sidoo kale waxay hayaan kheyraadka bulshada kuwaas oo laga yaabo inay qoyskaaga ka faa'iideystaan.

Kulamada IEP

MPS waxay sii wadaa qabashada shirarka sanadlaha ah ee IEP sida lagu sheegay tilmaamaha DPI. Inta lagu jiro kulanka IEP, kooxuhu waxay tixgelin doonaan haddii, iyo baaxadda, adeegyada magdhowga ah ama adeegyada dheeraadka ah loo baahan yahay hadda maadaama dib loo furay dhismayaasha iskuulka. Qoysasku waxay codsan karaan kulanka kooxda IEP ah waqti kasta si looga wada hadlo adeegyada dheeraadka ah. Macallinka waxbarashada gaarka ah wuxuu la shaqeyn doonaa xubnaha kooxda IEP si ay u qorsheeyaan shirar lagu qabanayo taleefanka ama iyadoo la isticmaalayo aalad khadka tooska ah oo waalidka/mas'uulka oggol yihiin. Kulamada fool ka foolka ah lama ogola xiligan.

Haddii aad tahay waalid/masuul oo qaba su'aalo gaar ah oo ku saabsan ilmahaaga naafada ah, fadlan la xiriir macallinka IEP-ga ardaygaaga ama kormeeraha waxbarashada gaarka ah, ama Waaxda Adeegyada Gaarka ah ka wac 414-438-3648.

Waad ku mahadsan tihiin inaad bahwadaag ka noqotaan waxbarashada.

Si daacad ah,

Jennifer Mims-Howell
Ku simaha Madaxa Tacliinta